

Casharro dabaasha oo bilaash ah ee xilliga xagaaga ee hoolalka dabaasha ee Espoo, kuwaasoo loogu talaggalay ardayda bilaabaysa fasalka koowaad

Casharrada dabaasha ee ardayda bilaabaysa fasalka koowaad waxaa loogu talaggalay carruurta aan dabaasha aqoon ee bilaabi doonta iskuulka xilliga dayrta ee 2026-ka. Waalidku waxaa uu ilmaha u diiwaangelin karaa ugu badnaan laba cashar oo dabaasha ah.

Inta lagu guda jiro casharrada barashada dabaasha, ardaydu waxaa ay baran doonaan in ay biyaha dhexgalaan, sida loogu dhex socdo biyaha, iyo sida biyaha loo afuufo oo xumbada looga sameeyo, sidoo kale waxaa ay baran doonaan qalabka dabaasha ee kala duwan, iyadoo la adeegsanaayo sheekooyin iyo ciyaaro. Dhammaan casharrada dabaasha ee ilmaha la siinaayo waa isku mid. Muddada halkii cashar uu soconaayo waa 30 daqiiqo. Tirada kooxda waa 10 carruur ah, iyadoo halkii koox ee kastaa ay isugu jiraan wiilal iyo gabdho. Koorsada dabaasha waxaa lagu bixinayaa luqadaha af-finishka, af-iswidishka iyo af-ingiriisiga. Naadiga dabaasha ee Cetus Espoo ayaa mas'uul ka ah barashada dabaasha.

Ilmuhu waa in uu awoodaa in uu wax la qaban karo oo la shaqayn karo kooxda, iyadoo uu kooxda hagaayo macallinka dabaasha, islamarkaana waa in ilmuhu uu ku dhiirrado inuu galo berkedda dabaasha isagoo aanay waalidkiis la socon.

Qolka dhar beddelashada gudihisa iyo meelaha qubayska waxaa ilmaha mas'uul ka ah waalidka. Hoolalka dabaasha waxaa ay leeyihiin qolal dhar beddelesho oo gaar ah oo loogu talaggalay jinsiga kala duwan ee ragga iyo dumarka. Si kastaba ha ahaatee, carruurta da'doodu ka yar tahay xilliga iskuulka, iyadoo ay la socdaan waalidka waxaa ay isticmaali karaan isla qolka dhar beddelashada, iyadoo aan loo egeynin dhanka jinsiga. Waalidka ayaa ilmaha keenaaya berkedda dabaasha. Macallimiinta dabaasha ayaa jooga berkedda, waxaana ay mas'uul ka noqon doonaan ammaanka berkedda ee inta lagu jiro casharrada dabaasha, wixii intaa ka baxsan ilmaha waxaa ka mas'uul ah waalidka. Haddii waalidku uu bixiyay kharashka soo gelitaanka hoolka dabaasha, wuu dabbaalan karaa inta lagu jiro casharrada dabaasha. Haddii kale, waalidiintu waa in ay ka baxaan goobaha berkedda dabaasha.

Qalabka loo baahan yahay: Tuwaal ama shukumaan iyo dharka dabaasha. Dharka dabaasha sidoo kale wuxuu noqon karaa burkini. Waxaa sidoo kale wanaagsan in la soo qaato muraayadaha dabaasha ee qofka u gaarka ah.

Goobaha casharrada dabaasha:

- Hoolka dabaasha ee Leppävaara (casharradu waxaa ay ku bixi doonaan luqadaha af-finishka iyo af-iswidishka)
- Hoolka dabaasha ee Matinkylä (casharradu waxaa ay ku bixi doonaan luqadaha af-finishka, af-iswidishka iyo af-ingiriiska)
- Hoolka dabaasha ee Keski-Espoo (casharradu waxaa ay ku bixi doonaan luqadaha af-finishka iyo af-iswidishka)

Jadwalka isdiiwaangelinta iyo casharrada dabaasha:

<https://www.cetus.fi/kurssit/lasten-kurssit/yhteistykurssit-espoo-kaupungin-kanssa/tulevien-ekaluokkalaisten-uinti/>

Isdiiwaangelintu waxaa ay bilaabanaysaa 11.05 2026.

Macluumaad dheeraad ah

- Isdiiwaangelinta: info@cetus.fi / Cetus Espoo
- Arrimaha kale: Maija Pelttari, maija.pelttari@espoo.fi, tel. 040 636 8380 / Magaalada Espoo